

## Adeegyada Sharci Dembiyedka

Adeegyada sharci dembiyedka LAO waxa ka mid ah qareen la taliye goob-joog maxkamad, oo ah qareeno siin kara caawimo dhakhso leh dadka dakhligoodu hooseeyo ee hor yimaad maxkamadda qareen la'aan. Adeegyada kale waxa ka mid ah ilaa 20 daqiqo oo la-talin sharci oo arrimo kooban ah oo laga helo qareen, wakiilnimo sharci laga helo qareen gaar ah (birifaati), ama isu diridda bartayada internetka ee sharciga ah ee, LawFacts.ca.

Arrimo dheeraad ah ka ogow  
[legalaid.on.ca/criminal](http://legalaid.on.ca/criminal)

## Adeegyada sharciga saboolnimada

Rugo sharciyedka beesha ayaa kaa caawin kara baahiyaha aasaasiga ah sida guriyaynta, daryeelka caafimaadka iyo shaqada. Adeegyada la heli karo ayaa ku kala duwan kolba siday yihii kheyraadka rug kasta. Arrimaha sharciga qaarkood ee ruguhu u adeegaan waxa ka mid ah:

- arrimaha gargaar bulsheedka iyo racfaannada loogu talagalay arrimaha Ontario Works iyo Barnamijka Taageerada Naafada Ontario (Ontario Disability Support Program)
- Rafcaannada Caymiska Shaqada
- rafcaannada Ammaanka Goobta Shaqada ee Guddiga Caymiska
- ka gargaarka arrimaha guriyaynta oo ay ka mid noqon karaan matalaadda Guddiga Mulkiilaha iyo Kiraystaha
- Rafcaannada ama arrimaha Canada Pension Plan (Qorshaha Hawlgabka Canada)

Rugaha qaarkood ayaa ku bixiya gargaar mowduucyada kale ee sharciga, iyada oo ku xiran baahida deegaanka.

Si aad u hesho rug sharciyed deegaanka ah, booqo [legalaid.on.ca/clinics](http://legalaid.on.ca/clinics)

## Nala soo xiriir

### Nagu soo wac lacag la'aan lambarka **1-800-668-8258.**

Adeeggaa waxa la heli karaa Isniiinta ilaa Jimcaha, 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo.

Adeegga TTY loogu talagaaly dadka maqalka wax ka qaba: 1-866-641-8867

### Af Ingiriisigu ma aha luqaddaada kowaad miyaa?

Adiga oo waca lambarka lacag la'aanta ah ee LAO ayaa kaa caawin doonta inaad marin u hesho macluumaa guud oo aad u kala duwan, iyo talo sharci kooban iyo codsiyada loogu talagalay gargaarka sharciga in ka badan 200 luqaddood.

### Nagu soo booqo khadka internetka halkan [legalaid.on.ca](http://legalaid.on.ca)

Booqo bartayada internetka si aad u heshid wixii macluumaa dheeraad ah ee ku saabsan adeegyada LAO ama LawFacts.ca wixii su'aalo ku saabsan sharciga qaxootiga jawaabahooda, sharci dembiyedka, arimaha caafimaadka dhimirka iyo ilaha haddii aad isu-aqoonsan tahay inaad tahay Dadkii Asalka Waddanka loogu yimid.

### Kuma faraxsanid adeeggayaga miyaa? Nala hadal anaga

Haddii aadan ku faraxsanayn adeeg LAO, ama rug sharci beeled ama qareenka kaalmada sharci, waxaad ka samayn kartaa cabasho.

Fadlan booqo [legalaid.on.ca/complaints](http://legalaid.on.ca/complaints), ama soo wac **416-204-7104** ama **1-866-874-9786**.



# Ma u baahan tahay qareen oo ma awoodi kari wayday?

Maalin kasta, Legal Aid Ontario (LAO) ayaa caawisa ku dhawaad 4,000 oo dad dhaqaale ahaan danyar ah oo ay ku jiraan waalidiinta kalida ah ee ka raadinaya taageerada ilmaha lammaane hore ee bixinta dib uga dhacday, dhibbanayaasha colaadda qoyska; waalidiinta doonaya haynta carruurta si ay uga badbaadiyaan si xun ula dhaqanka; qaxootiga, shaqaalaha dhaawacmay, iyo dadka la soo dacweeyo.

## Adeegyada gargaarka sharciga

- Gudaha maxkamadda.** Lataliyaha goob-joogga ayaa ah qareeno si dhkhso leh u qiimayn kara dhibaatooyinka sharciyeed ee macmiilka oo siin doona talo, macuumaad iyo wakiinimo qofka haddii kale wakiinimadu ku yaraanayso oo aan lagu taageeri dooni gudaha maxkamadda. Macaamiisha ayaa sidoo kale la hadli karta qareenada joooga xarumaha macluumaadka sharciga qoyska—ee ku yaal badiyya maxkamadaha qoyska— si ay u helaan talo sharci guud oo lacag la'aan ah oo ku saabsan arrimaha xeerka qoyska oo ay ugu helaan caawimo eegitaanka dukumnetiyada sharciga.
- Telefoon iyada oo la isticmaalo.** Adeegyada lacag la'aanta waxa ka mid ah macluumaad, u diritaan, codsiyada gargaarka sharciga iyo talo laga helo qareen.
- Wakiinimo laga helo qareen gaar ah.** Dhaqaale ahaan macaamiisha u mutaysan ee arrimaha sharciga leh ee ay dabbarto LAO ayaa codsan kara foojar, oo dabbaraysa kharashka qareenka tiro saacado cayiman.



## U qalmidda adeegyada sharciga

LAO ayaa siin doonta adeegyada ugu fiican ee ugu habboon arrimahaaga sharci. Si aad u hesho gargaar, waa inaad u qalantaa dhaqaale ahaan oo waa in arrintaada sharci ay dabbarto LAO.

Markay yihin arrimaha sharciga ee ugu culus, LAO ayaa laga yaabaa wakiinimo u bixiyaan iyada oo loo maro barnaamijkeeda shahaaddada. Kisisaka qaarkood, waxa laga yaabaa inaad dib u bixiso qaar ka mid ah ama dhammaan khidmadahaaga sharci. Fadlan ogsoonow inay tahay in aad u qalanto marka laga eego u qalmidda dhaqaale ee gaarka u ah barnaamijkan.

Si wax dheeraad aad u ogaato, na soo wac ama nagu soo booqo [legalaid.on.ca/eligibility](http://legalaid.on.ca/eligibility)

## Arrimaha socdaalka/qaxootiga

Haddii aad ugu baahato caawimitaan soo gelidda ama joogitaanka Canada qaxooti ahaan soo haajire ahaan, LAO ayaa kaa caawin karta sheegashooyinka qaxootiga, dib u eegidda xabsiga, amarrada masaafurinta, racfaannada isbonsar garaynta, dib u eegidda arrimaha garsoorka iyo in ka badanba.

Ka hel macluumaad dheeraad ah  
[legalaid.on.ca/immigration](http://legalaid.on.ca/immigration)

## Adeegyada dhibbanayaasha colaadda qoyska

LAO ayaa siisa marin u helid qareen kaa caawin kara arrimaha sharciga sida:

- hsida loo helo amarka xakameynta
- sida horey loogu sii wato kala-tagga ama isfuritaanka
- inaad xaq u leedahay inaad carruurtaada qaadato iyo in kale haddii aad ka tagto guriga
- sida loogu beddelo jeegga cayrta bulshada magacaaga
- sida looga saaro lamaanahaaga guriga ama loo soo ceshado alaabtaada
- masaafurinta, kala-dhaca ispoonsar-garynta iyo/ama ka bixintaanka arrimaha sheegashada qaxootinimada ee kas socota sheegashada wad-jirahaaga

Booqo [legalaid.on.ca/domesticviolence](http://legalaid.on.ca/domesticviolence)

## Arrimaha qoyska

Miyaad kala tagaysaan qofka aad wada jirtaan? Miyaad ugu baahan tahay haysasho ilmo ama marin u helid ilmo iyo biximo taageero? Miyaad ka fakaraysaa isticmaalitaa dhexdhexaadin? Ka caawin dukumentiyo, u gudbin qareenada latalin iyo hay'adaha kale ee adeeg bulsheedka, iyo xaaladaha qaarkood, wakiinimo laga helo qareen qoys ayaa laga heli karaa xarunta adeega sharciga sharciga qoyska.

Macaamiisha ayaa sidoo kale la hadli karta qareenada joooga xarumaha macluumaadka sharciga qoyska—ee ku yaal badiyya maxkamadaha qoyska— si ay u helaan talo sharci guud oo lacag la'aan ah oo ku saabsan arrimaha xeerka qoyska oo ay ugu helaan caawimo eegitaanka dukumnetiyada sharciga.

Ka eeg liiska buuxa ee adeegyada sharciga qoyska iyo goobaha aya ku yaallin halkan  
[legalaid.on.ca/family](http://legalaid.on.ca/family)